Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:4-aad **Tr:25.04.2016**

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa:4-aad,sacada fritanka.12:20 gh,sacada xiranka.2:20 gd.

Guntinta: 142 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Doodda Hindise Sharciyeedka lagu dhisayo Axsaabta Siyaasadda.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya

Mudane:Mahad Cabdalla Cawad.

1.Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdalla Cawad,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildh:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdalla wuxuu xildhibaana da uu u soo jeediyay,kalfadhga 8-aad, kulankiisa:4-aad Ajendaha manta waa hal qodob in aad no ansixisan ajendaha oo ah Doodda Hindise Sharciyeedka lagu dhisayo Axsaabta Siyaasadda xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha,Xoghayaha guud waxan ka codsaneynaa in uu diyaariyo Xokeyntii Doodda uqorta si waadax ah si guddiga wax ka bedel iyo wax ku kordhin ugu soo sameyn karaan.

3.Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdalla wuxuu xildhibaana da uu u sheegay in Doodda axsaabta an bilaabi doono xokeynta waa in aad soo qortan xildhibaanada fakarkooda ku kordhiyan iyo in ay wax ka bedel ku sameyn karan,xildhibaanada

maalintii hore ayay is qoreen madama ay goor dambe ahayd, xildhibaanada an is qorin waa la siinaya fursada, xeer hoosadka wuxuu na siinaya qof walba in uu dooda ku soo gunaanado 3 daqiiqo fursada dooda in aan ku ilaalino.

Xildhibaan:Yaasiin Cabdi Seed,wuxuu soo jeediyay, aniga ishan mariyay dhowr qodob oo ka mid ah qodobada lagu soo qoray qoraalkan,waxad mooda qaabka aan rabno in aan ugu guurno qaabka axsaabta iyo qaabka ay u qoran yihiin Dastuurka KMG, Dastuur KMG sida aad la socotaan waxaa ku socota howl,howsha ku socota waxa weye in KMG nimada laga saaro howshaas la geeyo ay fiiriyan talooyin keeda ay ka soo jeediyaan, suuro gal ma noqon karto axsaab ku saleysan habkii hore ee Dastuurka uu ahaa 4.5 ama hab goboleedyo lagu saleeyo mararka qaarkood waxaad arkeysaa in ay ku qoran tahay xisbiyo in uu ka furan yahay 18 gobol arrintaas waxaa weye hada waxay usu bedaleysa in xisbiga ka tirsan yahay ka mid noqoshaha ay noqon karto mid staydyada oo dhan oo ay noqon doonin midkii habkii gobolada, hada gobolada oo dhan waxaad mooda in uu sii socdo oo ay dhismayaan nidaam maamul goboleedyo ah, waxyaalaha aan aragnay waxaa ka mid ah sidaan la socono axsaabta waxaa lagu kala reeba xisbiga member shipka ah waxaa yeelan kara inputka laakiin inta badan axsaabta ee aa naqaano ee doorashooyinka gala shuruudaha lagu xiro kama mid noqon karo intaas oo kun oo qof uu leeyahay xisbiga oo doorasho waxay ku xiran tahay shuruudo gaar ah oo buuxin kara xisbiga qaab dhismeedkiisa laakiin xisbiga waa 10.000 qof oo member haysan kolay aniga kuma arag taa bedelkeeda wey fiicnaan laheyd xisbiga markuu doorasho galo muxuu noqon karaa bersantajka uu helo ayuu kaga mid noqon karaa axsaabta, waa cayaaraha balooniga oo kale qofbaa arsenal taageera kuwana ka mamid ah aha, mushkilada meeshatal waxay tahay qaabka loo soo qoro in uu jiro gab wali habka aan dooneyno iyo meesha aan u socono iyo habka aan dhameystirneyn ee Dastuurka ayaad mooda, waxaan oran lahaa wax badan ee aan is waafaqsaneyn ayaa meeshan ka muuqda Dastuurka iyo dhameystirkiisa, qolada kale ee ka dambeysa ha ahaato.

Xildhibaan: Cabdi Axmed Dhuxulow,wuxuu sheegay,waxan rabaa arrintan xisbiyada in aan wax yar ka iraahdo,saaxiibkii hada iga horeyay wuxuu yiri Dastuurka halaga fiiriyo,waxaa fiicnan lahayd in uu joogo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jawaari, xaga shintiriska Af-Soomaaliga markaan raadshay shintiriska wan ka waayay in la macneyo ayaa wanaag saneyd,shintiris ayaa waxay ku qorneyd xisbiyadan iyo sharciga xisbiyada Dastuurka in la meel mariyo 2015 Agost in dadweynaha loo bandhigo hadii ay suurta gal tahay ayaa ku dhigneyd, hadana sharcigaan Dastuurkan la sugeynaa macnaheeda waxa weye midba mida kale ha lagu dabaqabto oo leysku daba xiro midna yuu soo noolanin wadan kaan, aniga waxan leeyahay marka hore sharciyada xisbiyada in la aqbalo maxaa yeelay? Waxaan ka bixi weynay (tii) meeshii loo dhaqaaqo xal ayaa la waayay 4.5 halaga guuro ayaa la yiri ayaan dhaweyt waa la keeni wayay wado logo boxo, xagaa loo riixay, xagaa loo riixay, degmo halageyo, xaga halaga dhoco, degmoyinka hadii la geeyo in la tiriyo ayay u baahan yihiin, hadan xisbi la sameyn oo axsaab

wadankaan laga sameynin macnaheeda wadan kaan majiro waaye, Soomaaliya yay usu imanin waaye, yaan wax la wadaagin waaye, waasida hada markii dadka la sheekay sato dhahayan waqtiga la magaarin, kuwo qaarkoodna waxay leeyihiin, hadii xisbiga laga dhigo kuwan ma qaadaneysa, waa inaan Soomaali usu imaanin, gobolada dalka oo midba qeyb jooga maxaa usu keeni kara in leys weydiyo waye xisbi ayaa usu keeni kara, 15 sano, sanadkii 16 aad, ayaan Baarlamaanka ku jiraa, hal mar qof qof u tagtay Baarlamaanka dhexdiisa waa laga waayay, marka aan damacno usu jiida oo guruub saaxiibtinimo oo wax isla sameeya qabiilka ayaa lagu soo dhexdeynaa markaas ayuu kala qaada xagaas ayuu ku turaya qof walba,wax leysla wadado oo wax leysla qabsado ayaa axsaabta ah,hada waxa ugu xun oo xisbiyo sidaan ayaa dhanta, horta in xisbi la suubiyo waa muqadas, sidee loo suubinaa waaye,marka sida loo suubinayo waa lagu kor soconaa 4 sano Baarlamaanka sameynayo maalin walba waxbaa laga bedela axsaabta laftigooda markii ay yimaadan ay keenaan wado dowlada ku kor shaqeynayso xisbiga in la hirgalsho sharcigiisa halkaas ayay sax ka tahay,waxay soo qoreen sharci fiican oo shuruucda axsaabta dalka doorasho lagu gali karo ayaa la soo qoray mala dabaqi karaa ayaa imaandonta in Baarlamaanka loo keeno oo xukuumada loo gudbiyo 7 bilood alle ayaa gacan tooda ka keenay mahe ayaga marabin, guddi ayaa ka soo shaqeyay shuruucda wadanka ka soo shaqeynaysay oo sax ah oo waxba ka qaribneyn, meesha an is dhihi lahaa manta malatirin karaa oo 4 sano malagaari karaa ,waa la bedeli doona waa meesha kaliya oo saxda ah oo dadka laga dooran lahaa in axsaabta la doorto oo Baarlamaanka xisbiyo lagu soo galo oo tirada xisbiyada ruuxeeda ayaa la xadideyn oo la yiraahdo 20% xisbigii Baarlamaanka tiradiisa helaa ayaa ka mid noqonaa oo lagu xadido tirada Baarlamaanka, waxaan ku soo dhaweynaa sharcigaan waa in uu socda, Dastuurka xitaa ma socon karo hadii aan sharciga axsaabta la sii deynin isaga ruuxisa wuxuu ku xiran yahay in ay axsaabta jirto, mida kale maxaa anaga dhibaatadan oo maalin walba ka qoomameynayno dowladnimada xagey ka jirta kana socon la'dahay dad yar ayaa raba in dalka gacan ku qabtaan oo ayaga mesha ay rabaan u qaloocshan, wadan xisbi mucaarad aan ka furneyn wadan ma noqon karo oo aan la sheegeyn dhibaatada wadanka ka dhacday, waase wadanki oo dhan meesha uu jiro aan la ogeyn, waxaan idiinka codsana sharcigaan markii laga doodo waa in la aqbalo ka dibna wixii qaladaad ee ka soo baxa maalin kasta ayaa la bedeli karaa.

Guddoomiye ku xigeena 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cadala Cawad,wuxuu soo jeediyay,sharciga axsaabta siyaasadeed lagu diiwan galinayo ama xafiiska masu'lka diiwan galin tooda ama sharciga doorashooyinka labada aadbey ukala fogyihiin, markaa hanaankii dalka oo wax ku dooran lahaa waa sharci kale oo aad u baaxad weyn wali nalama soo hordhigin, laakiinse waxa weye ururo siyaasadeed oo hada jira side loogu cubi kara yaa masu'l ka ah iyo sharuudahooda maxay tahay oo sharciyad qaanuun ku yeelan lahaayeen weye sharcigan wuxuu quseya sidii leysku dooran lahaa iyo hanaankii doorashada, sharci gaar ah ayaan u samey saneynaa markii la rabo la bedeli karo.

Xildhibaan: Goodir,wuxuu soo jeediyay, sharcigan wuxuu ka yimid Baarlamaanka madama uu ka yimid Baarlamaanka wax badan oo ku jira aadbay u saxsan yihiin aniga waxan soo jeedin lahaa tirada xisbiyada in laxadado oo la sheego sababtoo ah meelaha qaarkood (10.000 kun) ayaa xisbiyada ku furmaan toban xisbi markaad ku dhufato toban kun waa boqol kun,boqol kun oo ka kala timid 9 gobol waa la heli karaa, laakiinse waxaan dhihi lahaa hala xadido oo halaga dhigo 3,5,7, qeybaha kale waa la diiday, laakiin qeybaha wadriga in lagu xadido (7) oo kale oo ay noqoto tiradaas in ayna ka badnaan Karin, shuruudaha kale oo 7 ay ku imanayaan ay noqoto xeerarka kale ee la sameyn doono, taas qodob kas ayaan soo jeedin lahaa, qodobka kale waxaan ku jirin xisbiyada barnaamijkooda oo dhan ayan ku jirin, hadii xisbiga uu noqdo xisbi qaran muxuu xasaanad uu yeelanaya, wuxuu ka soo baxay tar-tankii wuu guuleystay xisbi qaran buu noqday ama 2 halaga dhigo ama 3 halaga dhigo, guddoomiyaha muxuu xasaanad uu leeyahay ama nooca baasaboorka uu qaadanayo, nooca xuquuqda uu leeyahay, sida dhaqaalaha oo kale waa la sheegay, wixii xuquuq iyo xasaanad ay leeyihiin in halkaas lagu xuso lana cadeeyo uu san noqonin xisbi qaran oo ha dhow xukuumada banaanka ku bur-bursan uu yeesho wax cad, taasna waxaan guddiga dhihi lahaa xasaanada uu yeelanayo xisbiga in lagu soo daro, qodobka kale horay ayaa loo sheegay cida diiwan galinta yeelaneyso, Baarlamaanka federaalka wuxuu ansixiyay guddi doorashooyin Qaran iyo guddiyo kale oo hada la sameynayo oo tanaasulay oo la leeyahay sidan sharci maahan sidan ayaa sharci ah wallow isagoo taagan qole kale loo idmado, waa laga fiican yahay in loo dayo madama ayaga guddiga doorashooyinka ay yihiin yaa xaq u leh, yaa xaqani noqon kara inta guddi gaar ah la sameysto la yiraahdo guddiga diiwaan galinta cid gaar ah u shaqeyso si aysan u dhicin.

Xildhibaan:Fowsiyo Yuusuf Xaaji Aadan,waxay sheegtay,gobolada dalka qaar waa la sheegay sida uu sheegay Xildhi:Cabdi A.Dhuxulow, sharcigaan waa muhiim in deg deg loo sameyo waa muhiimada hiigsiga la hirgaliyo 3 bilood markii ay ka hartay ayaan wad wadnaa, awal dhowr jeer ajendaha waa laga saaray nasiib wanaag haduu helay, waxaan rajeynaya in si wanaagsan loogu dodo qodobada soo baxa in hadana deg deg loogu noqdo hadana laga doodo ka dibna la dhameystiro shacbiga iyo ururada sharcigan raja aad ah ayaa galeyso ,dadaalka waa muhiim masu'liyad ayaa inaga saran markii hore waxaa la oran jiray dowlada ayaa diidan, hada dowlada mar hore ayay noo soo gudbisay hada inaga ayuu inala yaalaa baarlamaan ahaan,qodo bada aan is leeyahay waxbaa laga bedeli karaa waa Qod.5 aad,f-7,X-d, qofka soo qoranayo xisbigan waxaa ku taala inuu balan qaado in uu sharciga u hogaansan yahay Dastuurka ayuu ku taala xisbiyada muhiim mahan waa in laga bedelo liiska Golaha dhexe, waxaa ku taala shaqaalaha dowlada xubin kama noqon karaan,shaqaalaha hoose waa ka midnoqon karaan, tiro kuma qorna, waxaan ku talin laha 5,6,7, in laga dhigo, waxaa kaloo jirta in meelo dhow ay ku taalo, waxaa la sameynayaa guddi diiwan galin ah oo markii la ansixiyo mudo 30 cisho ah, sharcigan wan ansixinay looma baahna guddi kale in la sameyo, Qod.22, X-d,araajida qofka

soo qoranaya xisbiga horumarinta wada lahanshaha isbedelka awoodaha ee hogaamiyaha waa wax is dhex daadsan, waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro qodobkaas.

Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu soo jeediyay,siday u sheegan xildhibaanadii iga horeysay sharciga dhismaha axsaabta siyaasadeed ee dalkan yeelanayo waa muhiim dib u dhigis kalana lama gali karo maxaayalay dhibka manta nahaysata,waxaa looga bixi karaa axsaab siyaasadeed oo Soomaali ku mideysan tahay waa dhulkii la dhihi jiray Jamhuuriyadda Soomaaliya waxa kaliya oo loo hanan kara waa xisbiyo Soomaaliya u dhan la helo,Mudane Guddoomiye waxan u mahadcelinaya guddigii At Hot ahaa ee uu hogaaminayay Xildhibaan:Jurile oo soo sheer gareyay iyo gudigii Arrimaha Gudaha oo ayagaana ku soo biiriyay, waxaan rabaa in aan sharcigan dhexda ka galo qodobada qaarkood sidii nuqulkii hore ee Baarlamaanka loo qeybiyay waxaad arkeysaa qaab sharciyeed buu uqoran yahay, F- iyo Qod.4,5,8, macnaha A,B,C, ayay ka dhigeen guddigii danbe ee hada, waxaa fiican in loo daayo sidii uu markii hore u qornaa, sidaas ayaa qaab sharci u eg faqrada iyo qodobka kow iyo namberka otoratigiisa ah mida muhiimka inaan ka hadlo, waxa weyan diiwan galinta 10.000 kun ah,Mudane Guddoomiye xisbiga in uu leeyahay toban kun oo mamber ship ah, waxay ila tahay siday xildhibanada ay shegan in hada an waxba la xadidin markii ay doorasho galan 4,7,8,11, midna la dhihine, xisbiga awooda uu ku yeesho doorashada leysla qaato kii gaari waayo isago indhihisa cad yihiin ha u dhamato, kii barsentejkisa gaari wayo 10 ha noqoto, 15 ha noqoto xisbigii dalka wax ku yeesho ha la arko,qodobka ay ka dhawaajisay xildhiban. Fowsiya,oo ah ka reeba naanta dadka aan ka mid noqon Karin member shipka waxaa lagu daray shaqaalaha dowlada, ciidamada, saraakiisha, safiirada, hadii shaqaalaha hoose laga reebo waxan u maleyn dona in nambar badan la weyn dono, in shaqaalaha hoose ee dowlada ka mid noqon karaan axsaabta, waxan guddiga ku biirinayaa xafiiska diiwan galinta waan arkay lifaaqa ku lifaaqan sharciga diiwaan galinta waxaa loo sameynaya xafiis gaar ah in kastoo ay nuqul danbe ay ka reeban Guddiga Arrimaha gudaha in kasto ay dhehan waxaa iska leh guddiga doorashooyinka, waxa muhiim ah marka in la cadeeyo xafiiskaas iyo awoodiisa hadii la sameyo xafiis diiwan galin iyo cida masu'lka ka noqoneyso iyo sida uu ku imanayo sharciga inuu cadeeyo waye, hadii sidii hore oo nuqulka ku qoran hadii aan u deyno guddigeenii doorashooyinka oo isaga masu'lka ah doorashada in uu kala xusho ayan qabaa.

Xildhibaan:Geesay,wuxuu sheegay,aragtida axsaabta siyaasadeed xisbiga asal waxaa ka horeeya sharci waana midka aan hada dultaa ganahay shuruucdii dalka ama ha ahaato ama Dastuurka an hada gacanta ku heyno ama qawaaniintii lagu dhaqmayay ama kuwii ka farcamayan oo Baarlamaanka ha ahaaden, laga bilaabo Golahan oo sharciga loo idmaday in ay ilaaliyaan soona saran ma ilaaliyan malagu dhaqma? Anigaa usu jawaabaya maya,waxaan sharci lagu dhaqmeyn waa feero beel,sharci waxaa loo soo saara in lagu dhaqmo oo umada lagu hago oo wax lagu qeybsado cidii ku qaldanta ay hesho ciqaab teeda, cidii ku dhaqantana ay hesho abaal marin, xisbi siyaasadeed waxa noqon kara dad ururay oo mabda' diinleh oo marka

Hore ku hamiyay in ay bulshada ka saran dayaca, waxa ay markaa ay dhex tagan tahay kaas wuxuu ka abuurma axsaab mideysan oo isku meel u jeeda oo u qeyb sameyn qabiil oo aan u qeyb sameyn ururu siyaasadeed ama diin ha ahaadeen ama wax kale taas waxad mooda in aan ka taganahay midnimada meesha loo idmaday oo la rabey qaranka soomaaliya inuu kasii socdo waa dadka aqalkan fadhiya iyo cida ay Matalan iyo dadka loo idmaday shuruucda dalka ay xukuumada madaxda u tahay intas waxad mooda in ay wadada ay garab maren, Qod.29aad xisbiga doorashada ka hor waxaa ka mid ah qofka xisbiga siyaasadeed usu soo sharaxayo qof ahaan tiisa iyo dhaqaalahiisa deynta lagu leeyahay in la diiwan geliyo horta masaamaxeysa duruufta manta lagu jiro ma suurta gal ma tahahay, aniga in axsaabta lagu ordo ma qabo.

Xildhibaan:Siciid Maxamed Cali,wuxuu soo jeediyay, xisbiga wuxuu u baahan yahay shuruuc, shuruucda naloo keenay aadbay u fiican tahay dhamaan in tii ka soo shaqeysay at Hot iyo guddiga hada gacanta ku qabtay wey mahadsan yihiin inta aan ka arkay shuruucdan marka awoodaha la sameynayo waa lagu kala tar tama marka koowad waa in lagu kala reeba qiimaha iyo qadarinta ay leeyihiin ama curaarta ay dhiganaayan waxaan arkay marka leys diiwan galinayo waxaa leysku diiwan galiya hadii KMG yahay,si ku meelgaar waxaa leysku diiwan galiya $500, hadii rigli yahayna waxaa leysku diiwan galiya $1000, aniga waxan meesha ka qaba qodobka shanta boqol ah iyo kan kun ka ah in laga badiyo sababta oo ah waxaan aragnay N.G.O., shaqsi shan boqol kensan karo xisbi ma noqon karo, diiwaan galinta koowad waa in ay noqoto $10.000, diiwan galinta labaad in ay noqoto $21-22, iyada oo xisbiyada waa faqsan taasna waxaa dhigaya Qod.5aad, sida codsiga iyo diiwan galinta loo sameynayo F-r, xisbiga wuxuu u baahan yahay 10.000 oo qof in ay iska diiwan galiyan, 9 gobol waa laga hadlay,ma waa faqsana barnaamijka hada la sameyay gobolada iyo istiratijiyada federaalka ma aqbalayo taasna waxaan qabaa in laga tir-tiro in istiraatijiyada lagu saleeyo 18 sharcigaas waxbaa iska badelayo taasna waxaa fiican in dib loo eego, Qod.11, xubnaha ka kareeban ka mid noqoshada xisbiga siyaasada muwaadin kasto oo soomaaliyeed waa u furan yahay, hadana waxa la sheegay shaqaalaha dowlada ayagaba in ay xisbi furtan oo leybar ah ama muruqmaal ah ayagaba xaq bay u leeyihiin ayagaba xaq bey u leeyihiin in ay furan karaan iyadana mabnuuc ma qabo in laga dhigo in qof muwaadin ah la reebo.

Xildhibaan:Tahliil,wuxuu sheegay,in dalka axsaab loo sameeyo wan qabaa hada xiligeeda mahan axsaab siyaasadeed oo aan hada sameyno kama qeyb gali karo isbedel ka 2016, waxaa inagu soo fooleh axsaabra siyaasadeed wax ka muhiimsan ayaa u yaalo Baarlamaanka sidii isbedel u dhici lahaa,waxa ay soo saaren xukuumada iyo guddoomiyayaasha gobolada,warqadi hii ay ku feegaren in Baarlamaanka saxno oo dalka sidii 2016 ugu dhici la heyd isbedel siyaasadeed aynu ka shaqeyno,waqtiga isagoo gaba gabo yahay isbedel siyaasadeed nalaga sugayo kama qeyb qaadan karan,waxaa Baarlamaanka iyo xukuumada isku raacnay in dalka hal qof ama hal cod aysan ka dhici Karin,sideedaba axsaab siyaasadeed waxaa lagu doortaa hal qof hal cod in la ansixiyo oo an la diidin wan qabaa laakiin hala sugo xilgeeda, axsaabta waa in

la xadadaa waa in uu jiraa xili lagu kala reebo oo doorasho ku kala haraan, 2016 in uu isbadal dhaco oo Baarlamaankana hurmuud ka noqdo.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,,wuxuu soo jeediyay,waxaan rabaa in aan ogaado xisbiyow maxa tahay, xisbi waa dad isku urur ah oo isku mabda'ah,dhaqaalaha,siyaasada, wixii dalkooda ka maqan ayay ku midoben, inaga dalkeena iyo wayo aragnimo ayan uleenahay dad axsaabtii iyo wayo aragnimadii soo martay, inta aan xornimada laqaadan axsaabta waxay ahayd nabadiid, leegada oo ah xoriyada iyadana ku guuleysatay markaas, waxaana ku guuleysatay leegada oo ah umada soomaaliyeed oo dhan ku mideysan tahay, markii mudo la soo socday waxaa bilowday qabiil oo aan macno laheyn, waxaa abuuran tay 88 xisbi baaka qeyb galay wax xisbi lagu sheegi karay waxaa ka jiray 3 xisbi doorashooyinkii markii ay dhamaatayna leegadii ayaa soo hartay, waxan soo jee dinayaa in la xadado xisbiyada oo nambar yar lagu soo reebo 3 in aysan ka badan waxaana diiwaan galineysa dowlada hoose,qof walba degmada uu joogo ayuu ka furanayaa xisbiga.

Xildhibaan:Axmed Taw,wuxuu sheegay,waa dhiire galineyna sharcigan 1969 kii ka hor wey jireen, waa muhiim sharcigan waayo wuxuu noo sahlaya sameynta xisbiyada waa in aad loogu fakaraa shuruudaha diiwaan galinta xisbiga, nidaamkan xisbiyada waxan qabaa nidaamka kaliya oo Soomaaliya usugu imaankarto in uu yahay axsaabta waa muhiim in la dhiiri galiyo oo xooga la saaro waxaa xusud mudan in lagu midoobo afkaarta wacyi galintiisa in la helana muhiim ayay tahay, xisbiga ladiiwaan galinayo waa in uu yahay mid maslaxada dalka xambaarsan,waxaan codsanaya in aan sharcigan an saxino uuna dhaqan galo.

Xildhibaan:Maxamuud Axmed Kulalihi,wuxuu soo jeediyay, 25 April waa maalintii cirib tirka Duumada,sharcigan xisbiyada wuxuu u qoran yahay sida Road Mapka waa sharci wanaagsan, xisbi diin ah ma noqon karo, xisbi midab takoor looma baahna xisbi waa in uu meel walba ku yeelan karo wakiil iyo xafiisyo qof kasto oo soomaali ah waa in uu noqon karaa masu'l xisbiga laakiin nin masu'l sare ah ee dowladda ah ma noqon karo masu'l xisbi, nin is hortagi karo majirto sharcigan Dastuurka ayaa ka weyn.

Xildhibaan:C/laahi Goodax Bare,wuxuu sheegay,sharcigaan wuxuu soo maray 3 gacan juhdi badan baala galiyay waxana loo soo gudbiyay golaha wasiiradda, golihii wasiirada waxay usii gudbiyan Guddoonka,guddoonka wuxuu keenay Golaha Shacabka, diiwan galin kaliya mahan ma dhici karto in wasaarada arrimaha gudaha masu'l ka noqoto dacwooyin badan ayaa ka soo baxay xisbiyada guddigan waxad moodeysa in uu yahay guddi dayacan guddoomiyahiisa ma aragno jeesow oo kaliya unbaa aragna wan akhriyay kii uu waday xildh. Jurile waday hadii aan ka xakameyno dhaqaalaha 14% xildhibaan xisbigii yeesho waa xisbi qaran 15% kii noqdana mahan mid jira .

Xildhibaan:Maxamed mayow (rush) wuxuu soo jeediyay,sidii dalka ku yeelan laha xisbi waa mid Dastuuri ah xildh.Jurile ayaa in badan ka soo shaqeynayay iyo 10 kale waxan qabaa in uu dalka u baahan yahay axsaab madama dalka uu yahay federal Qod.49, f-1aad,waxaa ku qoran go'aanka waxaa gaaraya Baarlamaanka, Qod.49, f-5aad waxan qabaa in la tiro kobo inta ay noqon karaan tiradooda wan soo dhaweynayna shuruucda axsaabta.

Xildhibaan:Ibraahim Yarow Isaaq,wuxuu sheegay, sharcigan mabda' ahaan in aan u kala saaro sharcigaan na horyaala waqtigiisa waa laga gaabiyay isbedal baa lagu jiraa oo doorasho ayaa la galaya baahi jirto ayaa loo sameynayaa balse hada sadexdan bilood laguma shaqeyn karo baahi diisa hadana ma taagno sharcigan waa inuu noqdaa Dastuurka cusub mid waa faqsan

Qod.2aad, f-6aad,sinaanta jinsiga ayuu ka hadlaya wuxuu leeyahay sinaanta lab iyo dhidig waa in la waa fajiyaa diinta islaamka.

Xildhibaan:Guure,wuxuu soo jeediyay,waxaan u mahad celinayaa guddigii k asoo shaqeyay iyo guddiga arrimaha gudaha oo gacanta ku haya sharcigan waxan ku talinayaa in la ansixiyo xitaa hadii an hada la isticmaali Karin wuxuu na anfacayaa 2020, taa soo 4ta sano ee soo socota ay xisbiga sii bar baaran diiwan galinta xisbiga in laga dhigo $ 5000, diiwan galinta rasmiga ahna laga dhigo $ 10.000 tirada xisbiga ugu badnaan 3 xisbi,waxan rabaa in laga saaro beelaha iyo jinsiga waa (a) iyo (d).

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu sheegay, sharcigaan xisbiyada marhore ayay ahayd in aan ansixino madama an hada heysano sharci ka hadlayo xisbiyada aan ansixino sharcigaan,xisbi yan lagu dhisin magac diimeed side loo xadidayaa tirada xisbiyada? Waa la soo koobaya ama waxay ku kala harayan tartanka Baarlamaanka waa in uu dadajiyaa shuruucda xisbiyada.

Xildhibaan:Bare Ugaas,wuxuu soo jeediyay, waxan ku talinaya in aan la xadidin tirade xisbiyada madama aan Demoqraadi nahay tirade ay doonan ha noqdeen ayagaa tar tanka ku kala haraya wasaaradda arrimaha gudaha ha loodayo diiwaan galinta xisbiyada.

Xildhibaan: Shariif maxamed Cabdalla,wuxuu sheegay,sharcigaan goor hore ayay ahayd in la ansixiyo,maxkamadaha iyo ciidamada cidan ahayn waa ka mid noqon karaa, waa uu ka mid noqon karaa xisbi diineed in la aqbalo iyadoo shuruuc loo sameynayo.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu soo jeediyay, guddigii ka soo shaqeyay sharcigan waa mahadsan yihiin Qod. 5aad, ee ka hadlayo diiwaan galinta ku meel gaarka iyo diiwan galinta rasmiga ah waxaan qabaa in diiwaan galinta ay mid ahaato sharcigaan kuma cada activityga siyaasadeed ee uu xisbiga ka sameyn karo gudaha iyo dibada.

Xildhibaan:Daadir Aamiin Jeesow,wuxuu soo jeediyay, awalan waad mahadsan tihiin saaxibaday xildhibaanada afkaartooda qaaliga waa loo bahna wan qaadaneyna inta karan keena

Ah wey soo dadaaleen inta nagu dhaliishay sharciga oo an u hagar bixin hadan u hagar baxeyna xildhibaanada oo aaminsan guddigii diiwan galinta layirahdo oo ku shaqeya in uu noqdo guddi madax banana oo gaar ah waxan ku kor sameyna Dastuurka Qod.31 ee sharcigaan qalin horaadka kii guddiga ay keenan guddiga madaxa banana oo diiwan galinta la yiraahdo guddigan markuu eegay sharcigan Qod.111g,X-t, Dastuurka wuxuu Dastuurka u xilsaaraya diiwan galinta guddiga doorashooyinka marka Dastuurka in aan baal marno ayaa nagu adkaatay hadii la baal marayo waxay u baahatay in xildhibaanada ay isbedel ku sameyan, sidoo kale Qod.37aad, habka maxkamadaha,marka aan aamin sanahay in maxkamad gaar loo sayo xisbiyada waxaa jiro qodob Dastuuri ah Qod.118 oo Dastuurka dhigaya maxkamadaha dalka qaabka ay u dhisan yihiin, maxkamadaha dalka maxkamadaha degmada anaga ma soo gali karno maxkamada xisbiyada labadaas guddi waxaa si dhab ah u diiday Dastuurka, guddigeena malahan ee waxaa iska leh Dastuurka, Dastuurka cid walba ayuu ka sareeya, arrinta diinta, diinta dhib malahan isagoo diintiisa aaminsan ayuu yahay xisbi Demoqraadi waxaa la diida ficilka uu xisbiga la imanayo xisbiga in la yiraahdo dagaal waye iyo in la yiraahdo xisbi waa ka baxsan yahay sidan waxan ugu soo qornay in uusan xagjir ahayn, xildhibaanada wey mahad san yihiin.

Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:4aad, uu shir Guddoominayay,Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Shacabka Mudane:Mahad Cabdala Cawad,uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 2:20 gd.